

Kaabayaasha Daadka Roobka ee Dariiqa Chief Sealth Trail



Yaraynta wasakhowga biyaha dabaylaha iyo hagaajinta qulqulka biyaha

Abril 2024

Dulmarka Mashruuca

Biyaha duufaanta ee ku dhaca saqafyada, waddooyinka, iyo meelaha baabuurta la dhigto ee xaafadda waxay soo qaadi karaan wasakh waxyeelleyn badan ka hor intaysan ugu dambeyntii ku shubmin Lake Washington. Wasakhdaan waxay dhaawici kartaa kalluunka, duurjoogta, iyo nidaamyada bey'adda.

Seattle Public Utilities (SPU) waxay dhisi doontaa kaabayaal cusub oo biyaha dabeysha/roobka qaada isgoysyada S Kenyon St iyo Chief Sealth Trail si loo maareeyo daadka biyaha dabeysha ee xaafadda Othello.

Mashruucu wuxuu keeni doonaa horumarrino meelo bannaan oo isticmaala ciid khaas ah iyo dhir xidid qoto dheer si loo shaandheeyo oo si ku meel gaar ah loogu hayo biyaha duufaanka. Tani waxay yaraynaysaa wasakhowga iyadoo la abuurayo meel bannaan oo hagaagsan.

Mashruuca waxaa la dhamaystirayaa iyada oo lala kaashanayo Waaxda Gaadiidka Seattle iyo barnaamijkooda Jidadka Badbaadada leh ee Dugsiga, kaas oo horey u dhamaystiray balaarinta dariiqa lugeynta ee aagan. SPU waxay sidoo kale iskaashi la

samaynaysaa Seattle City Light iyo Xafiiska Farshaxanka & Dhaqanka Seattle si ay ugu qurxiso aaga farshaxanka dadweynaha.

Jadwalka Mashruuca

Laga bilaabo Maarso 2024, mashruucu wuu ku jiraa nashqadeynta iyo ogolaanshaha kaas oo la filayo in la soo gabagabeeyo 2025. Dhismuhu wuxuu dhici doonaa inta lagu jiro xagaaga 2026.

- Naqshadeynta iyo Ogolaanshaha: 2024 - 2025
- Dhismaha: Xagaaga 2026

Ka-qaybgalka bulshadu wuxuu dhici doonaa inta uu socdo mashruucu, gaar ahaan inta lagu jiro dayrta 2024 si loo bixiyo cusboonaysiinta iyo ururinta jawaab-celinta la xidhiidha naqshadda farshaxanka dadweynaha.

Faa'iidooyinka Bulshada

- Daadka dabaylaha oo laga soo koobo 25 acres oo ah aaga magaalada ee xaafadda Othello
- Lake Washington oo ka caafimaad badan iyo nidaamyada bey'adda, harada, iyo biyaha cusbada
- Horumarino Dhir lagu Qurxiyay
- Farshaxan dadweyne

[Booqo bog-khadka mashruuca.](#)

[Baro SPU iyo adeegyadaada bullaacadaha iyo biyaha wasakhda ah.](#)



Figure 1: Updated rendering of the planned green stormwater infrastructure along the Chief Sealth Trail, near Wing Luke Elementary.

Xiriirka Mashruuca

Sierra Gawlowski, Maareeyaha Mashruuca | Sierra.Gawlowski@seattle.gov | (206) 684-4582
Seattle.gov/utilities/ChiefSealthGSI